



Auckland Regional Public Health Service

Rātonga Hauora ā Iwi o Tamaki Makaurau



Working with the people of Auckland, Counties Manukau and Waitemata


Auckland Regional Public Health Service

Rātonga Hauora ā Iwi o Tamaki Makaurau



Working with the people of Auckland, Counties Manukau and Waitemata

Markii dhaqtarkaagu kuu diro
takhasuslaha jooga isbitaalka ama
bukaan-socod-eegtada



Doctor Referral—Somali
July 2011

Dhaqtarku wuxuu kuu diray takhasuslaha jooga isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada. Waa lacag la'aan lagaamana qaadayo wax qarash lacageed ah.

Waxaad warqad ka helaysaa isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada oo uu la socdo waqtigii ballanta. Waxay badanaa qaadataa ugu yaraan saddex bilood si loo helo ballanta.

Iska hubi inaad aqriso warqadda markay kuu timaado ama ka weydiiso qof kale inuu kuu aqriyo. Waa inaad raacdaa tilmaan-bixinaha si aad u xaqiijiso inaad tegi doontid ballanta.

Haddii aad u baahato waxaad isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada weydiisataa turjumaan. Waxaad codsan kartaa turjumaan lab ama dhedig iyo lahjadda gaarka ah ee luqaddaada.

Haddaad u baahato inaad badasho ama ka noqoto ballantaadii waa inaad soo wacdaa isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada.

Haddii aadan aadin ballantaadii waxay kugu qaadanaysaa muddo dheer si aad u hesho ballan cusub waxaana lagaa saari karaa liiska sugi taanka.

Isbitaalku wuxuu warbixin u diri doonaa Dhaqtarkaaga Guud (GP). Haddii aad qabto wax ka badan hal GP warbixintu waxaa loo dirayaa dhaqtarkii kuu soo diray isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada.

Helidda ballanta isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada waxay u baahan doontaa qorshayn.

Waxaad u baahan tahay inaad hesho gaadiid ku geeya isbitaalka ama bukaan-socod-eegtada waqti fiican ka hor ballantaada. U ogolow nisfu-saacad si aad u hesho bukaan-socod-eegtada haddii aadan hore u tegin. Waxaa muhiim ah in waqtiga la dhowro si aadan u gefin tookadaada.

Haddii aad haysato carruur waxaa habboon inaad hesho xubin qoyska ah ama saaxiib ku ilaaliya carruurta guriga ama adiga agtaada isbitaalka. Taasi waa masuuliyaddaada inaad diyaarsato.